# Dabeecaddaha Kelitalisnimada & Gaboodfallada ka Dhasha Midiidinta

**WQ: Cabdiraxmaan Al Kawakibi**
**Tarjumadii Dr. Maxamed Sh. Cali (Doodishe)**

**Qeybta 2-baad**

**April 12, 2022**

---

## Kelitalisnimada iyo Diinta

Ra'yiga culimada rogrogta taariikhda dabeecaddaha diimaha, waxa uu isugu biyo shubtay in kelitalisnimada siyaasaddeed ay ka dhalato kelitalisnimimada diinta, qaarkoodna waxa ay yiraahdaan haddii aysan jirin in ay is dhaleen, waa walaalo oo aabahood waa amar-ku-taaglayn, hooyadoodna waa madaxtinimo, amaba waa kuwa si aad ah isugu muuqaal eg. Xiriirka ka dhexeeyaa waa baahida ay u qabaan inay dulleeyaan aadanaha, halka ay isaga egyihiinna waa midna waxa uu u taliyaa jirka aadamiga, kan kalana qalbigiisa. Labadaa kooxoodna waa ay ku saxan yihiin ra'yigooda, marka la eego khuraafaadka dadyawgii hore, iyo qeybaha taariikhiga ah ee Towraad iyo dhamaabalda dabayaalla ee Injiilka, weyse gafsan yihiin marka la eego qeybaha farriimaha akhlaaqda ah ee labadaa kitaab, sidoo kale waa ay gafsan yihiin haddii ay u malaynayaan in Qur'aanku u soo dagay inuu taageero kelitalisnimada siyaasaddeed, cudurdaar la aqbali karana ma aha inay yiraahdaan innagu ma haleeli karno macnaha qotada dheer ee Quraanka, ee ku hoos jira balaaqadiisa iyo cilmiga asbaabta loo soo dejiyay aayadaha Qur'aanka, waxaase go'aankeenna aan ku dhisaynaa wixii aan ku aragnay muslimiinta tan iyo qarniyo aad u fog oo ah in kelitaliyayaashu ay kaalmaystaan diinta.


Cabdiraxmaan Al Kawakibi

Sida ay qolyahaasu qabaanna awaamiirta diinta oo ay ka mid tahay kuwa kutubta samaawiga ah, waxa ay aadanaha farayaan in ay ka cabsadaan awood aad u wayn, oo aysan jiritaankeeda ku garan karin  caqilgooda. Awooddaa oo aadamiga ku cabsigelinaysa musiibo kasta oo nolosha adduunka ku kooban, sida diimaha Buudiga iyo Yahuudda ay dhigayaan, ama nolosha dunida iyo geerida kadib labadaba, sida diimaha Kirishtaanka iyo Islaamku ay qabaan, cabsigelintaas oo jirkoodu la gilgisho, tabartooduna hoos ula dhacdo, caqligooduna la amakaago, kadibna ay dhex-muquurtaan jahwareer iyo caajis, markaa kadib ayay awaamirta diintu u furtaa albaabadii ay uga badbaadi lahaayeen cabsida. Badbaadadaas oo leh nimco joogto ah, hayeeshee albaababadaa waxaa ku gadaamaan wadaaddo, kuhaan, baadariyaal iyo kuwa lamid ah oo aanan dadka u ogolaanaynin inay albaababadaa ka gudbaan, haddii aanay iyaga weynaynin, oo aysan isu

dullaynin, hoosna isugu dhigin, oo aysan quudinin; nadar ha siiyaan ama lacagta dembi-dhaafka e, waxaana intaa dheer in diimaha qaarkood, wadaaddadu ay ka horjoogsadaan -sida ay sheeganayaan- ruuxda aadanaha, geerida kadib inay la kulanto rabbigeed, haddii aanan la siinnin gibirkii ay ugu fasixi lahaayeen qabriga iyo madax-furashadii lagu badbaadin lahaa. In badan ayay hogaamiyayaasha diimuhu dadka ku cabsiiyaan carada Alle, iyaga oo uga digaya in ay haleeli doonto musiibooyin ka yimaada dhanka Alle iyo cadaabkiisa, kadibna wax ay u sheegaan in aysan badbaadaynin oo aysan nabadgalaynin haddii aanay magangelin qolyaha qabuuraha ku aasan, kuwaa oo qaddarin iyo saamayn ku leh Alle, caradiisana ka badbaadiya aadanaha.

Waxa ayna sheegaan in siyaasiyiintu xeelad lamid ah tan wadaaddada ay aasaas uga dhigaan kelitalisnimadooda, iyaga oo dadka ku cabsigeliya is-weynaysiin iyo san-taag. Waxay ku dulleeyaan jujuubid, awood-sheegasho iyo xoolaha oo laga dhaco, kadibna waxa ay ka dhigaan kuwa ayaga hoos jooga oo shaqaale u ah, oo ay adeegooda ku raaxaystaan si la mid ah sida ay ugu raaxaystaan xoolaha ay dhaqdaan oo ay caanahooda cabbaan, hilibkooda cunaan, gaadiidna ka dhigtaan, dabadeedna isugu faanaan.

Waxa ayna qolyahaasu arkayaan in isu ekaanshaha kelitalisnimada diinta iyo tan siyaasadda ee dhanka qaab-dhismeedka iyo natiijada ka dhalataba ay lamid tahay sida Faransiiska iyo Ruushku u adeegsadaan.  Dhanka Faransiiska labadan arrimood waa kuwa shaqo wadaag ah oo sidii laba gacmood oo mataano ah isu kaalmaysta, halka Ruushku labadan arrimood ay yihiin kuwa shaqadoodu isku dhafan tahay sidii loox iyo qalin oo kale, oo diiwaangelinaya rafaadka ummaddaha haysta.

Waxa ayna qolayahaasu hoosta ka xarriiqayaan in isu-ekaanshaha labadan awooddood uu ku riixo aadanaha aan aqoonta lahayn, oo ah dadka intooda badan, in ay isaga qasanto farqiga u dhexeeya Allaha xaqa lagu caabudo iyo kelitaliyaha qasabka loogu hogaansamo. Waxa ayna maskaxdoodu kala garan weydaa, heerka isu-ekaanshahoodu gaarsiisanyahay awgii, kan mudan in aad loo weyneeyo, iyo kan ka sarreeya weydiinta iyo in lagula xisaabtamo falkiisa, sidaa darteed uma arkaan inay xaq u leeyihiin in ay korjoogteeyaan oo la xisaabtamaan kelitaliyaha, maadaama uu farqi weyn u dhexeeyo weyninkiisa iyo yaraantooda. Haddii si kale loo yiraahdana caamadu waxa ay arkayaan in Allaha ay caabudaan ee xaqa ah iyo kan xoogga ku haysta ay wadaagaan xaaladdo badan, magacayada iyo tilmaamaha intaba, sidaa darteed dan iyo heello kama galaan kala saarista (Allaha awooddiisu aanay xadka lahayn), iyo midka ku xukuma amarkiisa, (Allaha aan la weydiinin wixii u sameeyo), iyo midka aan masu'uulka ahayn, (Allaha nimcada bixiya) iyo midka nimcada ay gacantiisa ku jirto, (Allaha haybadiisu sarrayso) iyo haybadlaha. Sidaa darteed ayuu aadanuhu u weyneeyaa kuwa ku amar-ku-taagleeya si lamid ah sida ay u weyneeyaan Allahooda,  iyadoo weliba sida ay Alle u weyneeyaan si ka sii sareysa u weyneeya kuwa ku amar-ku-taagleeya, sababtuna waa Alle oo ah mid dulqaad badan, deeqsi ah, cadaabtiisuna aanay soo degdegin, halka kuwa ku amar-ku-taagleeya ciqaabtoodu tahay mid horay ka haleelaysa, sida la yiraahdana caamadu waa indho-ku-garaadle, garashadooda iyo ficilkooduna ma dhaafsiisna xaaladda markaa hortaalla, waxaana la dhihi karaa haddii aadanuhu aanu rajo ka qabin Alle, oo aanay u cabsoonaynin noloshooda dunida, mana aysan soomeen, salaadna foodda ma saareen, sidoo kalana haddii aanay rajo degdeg ah qabin, aqrinta wardiga dariiqada kama ay hormariyeen aqrinta Quraanka, ku dhaarashada magaca awliyadana kama aysan hormriyeen ku dhaarashada magaca Alle.

Xaaladdanina waa tan fududeysay in kelitaliyayaasha ummaddiihii tagay qaarkood ay sheegtaan ilaahnimo, taasoo ay heerarkeedu kala duwan tahay, hadba si waafaqsan garashada dadka ay hogaamiyaan, waxaana la oran karaa ma jiro kelitaliye xitaa kuwa maanta jooga oo aanan samaysanynin tilmaan muqaddas ah oo uu Alle la wadaago, amaba siinaysa maqaam Alle xiriir la leh, midda ugu yarna waa inuu samaysato la-taliyayaal diinta ku adeegta, oo ku kaalmeeya inuu dadka ku dulmiyo magaca Alle, waxa ugu yar oo ka dhalan kara kelitalisnimadaasina waa ummaddaha oo loo kala qaybiyo madaahib iyo kooxo dirirsan, oo midba ta kale iska caabinayso. Halkaas oo ay ku burburto awooddii ummaddu lahayd, kelitalisnimaduna hesho jawi munaasib u ah oo ay ku ukuma dhasho, taasina waa siyaasadda Ingiriisku kula dhaqamo dalalka uu gumaysto, halkaasoo awoodda ugu badan uu ka helo kala-qaybsanaanta shacabka iyo iyaga oo awooddii ay lahaayeen isku baabi’ya, kadib marka ay isu khilaafaan mad-hab ahaan iyo diin ahaan.

Waxa ay qolyahaasu ku cilladaynayaan falalkii ay sameeyeen kelitaliyayaalka ay ka mid yihiin (Ilmo Daauud) iyo (Konostantiin) oo ah inay diinta ku faafiyeen dadyowgii ay hogaaminayeen, iyo sidoo kale u gaargaaridii ( Filib-kii 2aad) ee reer Spain iyo ( Henery-gii 8aad) ee  Ingiriiska, ay u gargaareen diinta ilaa ay ka sameeyeen maxkamado u gaar ah, oo la soo taago dadka lagu eedeeyo inay diinta khilaafeen, iyo sidoo kale u gargaaridda uu hogaamiyihii Faadumiyiinta iyo madaxdii cajamka ahaa ee Islaamku ay u gargaareen Suufiyadii xagjirka ahayd, iyo mawlacyadii ay u dhiseen, in ujeedooyinka laga lahaa ay ahayd adeegsiga diin la dhalanrogay iyo qaar kamid ah ahlu-diinka wacyigoodu hooseeyo oo gabbaad laga dhigto si masaakiinta loogu dulmiyo, arrinka ugu weyn ee u suurogalinaya kelitaliyuhu in ay sidan wax ugu fulaanna waa dadka oo qaacidooyinka iyo awaamiirta diiniga ah u hogaansama ayaga oo aanan wax baaritaan ah ku samaynin, ama aan dood gelinin, sidaa si la mid ah ayuu kelitaliyuhu doonayaa in dadku amaradiisa ugu hogaansamaan sida ay ugu hogaansamayaan awaamirta diinta, ujeeddadaa darteed ayayna in badan kelitaliyayaashu isku dayaan in ay amarradooda iyo wixii ka farcama u sameeyaan saldhig diineed.

Qolyahaasu waxa ay hoosta ka xarriiqayaan in kelitalisnimada siyaasaddeed iyo tan diiniga ahi uu ka dhexeeyo xiriir aan kala go’aynin, oo haddii midkood uu jiro waxa uu horseeda midka kalana in uu yimaado, haddii midkood uu meesha ka baxana midka kalana waa uu raacaa, haddii tabardarri haysa midkood uu ka soo kabsadana kan kalana waa ka soo kabsadaa. Waxyna oranayaan arrimaha ka marakacaya xiriirkaa isaga ahna waa ay badan yihiin, waqti kasta iyo goor kastana waa lagu arkaa. Waxa ayna caddeeynayaan in saamaynta diintu ka xoog badan tahay tan siyaasadda, haddii ay ahaan lahayd in wax la hagaajiyo ama la fasahaadiyo, waxa ayna tusaalle u soo qaadanayaan qolyaha Saksoonka “Saxon” oo ah Ingiriiska, Holland, Maraykan iyo Jarmal, qolyahaa oo ah kuwa qaatay mad-habta Borotestanka “Protestant”, waayoo saamayntii ay xorriyaddihii diinta ee mad-habka Borotestanku ku yeelatay horumarinta siyaasadda iyo akhlaaqda ayaa aad uga weyn saameynta xoriyadda  dabarka-goosatay ee siyaasaddeed ay ku yeelatay dadka Laatiinka ah, oo loola jeedo Faransiiska, Talyaaniga, Isbayn iyo Bortaqiiska, waxa ayna isku waafaqeen qoraayaasha siyaasadda ee aadka ugu xeel-dheer, iyaga oo cuskanaya taariikhda iyo dabagalka ay ku sameeyeen, inaanay jirin ummad, qoys ama qof isku adkeeyay diinta oo aanay dunidiisu burburin, oo aanan seegin labada daaroodba.

Gundhigga doodduna waxa ay tahay in xeeldheerayaasha siyaasaddu ay arkayaan in siyaasadda iyo diintu ay is hareer socdaan, arrinka tixgelinta lehna uu yahay in diinta oo la horumariyo ay tahay waddada ugu sahlan, ugu awoodda badan, uguna dhaw ee lagu horumarin karo siyaasadda.

Waxaa loo badaniyaa in qolyihii ugu horreeyay ee u adeegsaday diinta, in la horumariyo siyaasadda ay ahaayeen xikmadlayaashii Giriiga, waxayna isticmaaleen xeelad ay uga dhaadhiciyeen boqorradoodii kelitalsika ahaa, inay ogolaadaan in siyaasadda lala wadaago, ayaga oo nooleeyay caqiidada shirkiga , oo ah in ilaahnimada la wadaago, taa oo ay ka soo amaahdeen Aashuuriyiintii “Assyrians”, waxayna ku lareen khuraafaad dhigaya in awooddaha la kala qaybiyo iyaga oo caddaaladda u gooni yeelay ilaah, dagaalkana mid kale, roobkana mid kale iyo qaabab la mid ah, oo ay awooddihii ku kala qaybiyeen. Waxayna u sameeyeen ilaah guud oo dusha ka maamula, oo u kala garsoora haddii uu khilaaf ka dhex dhaco. Kadib markii ay ku guuleysteen in caqiidadaasu gasho dadka qalbigooda, iyagoo adeegsaday muuqaalo soo jiidasho leh iyo aftahnimo indhosarcaadisay, ayaa waxaa u sahlanaatay in ay dadka ku riixaan in ay ka codsadaan hoggaamiyayaashooda awoodda ku haysta in ay ka tanaasulaan la keli noqoshada awoodda, oo dhulka loo maamulo sida samada loo maamulay, boqorradiina waxa ay ku qasbanaadeen in ay yeelaan codsigii shacbkooda. Tubtaasina waa tii ugu dambaynta gaarsiisay Giriiga inay dhisaan nidaamkii Jamhuuriga ahaa ee ka dhaqan galay Athens iyo Sparta. Sidaa si la mid ay ayeey Roomaan-kuna sameeyeen, asalkaasuna waa tusaalle qaddiim ah oo ku aadan kala qeybinta awoodaha maamulka, oo ay tan iyo maanta isticmaalaan boqrtooyooyinka iyo jamhuuriyadaha kala duwan ee caalamka ka jira.

Tubtaas wax wadaajinta “Shirkiga” ku dhisan, marka laga tago in ay tahay mid sideeda xaqa uga soo horjeedda “Baadil”, waxaa ugu dambeyntii ka dhashay fal-celis keenay dhibaatooyin aad u baaxad weyn, taasoo ah inay kitaab-gaablowyada u furtay alabaab ballaaran oo ay ku sheegtaan awooddaha u gaarka ah Alle, sida tilmaamaha muqadasnimada iyo falalka dahsoon. Arrinkaa oo markii hore ahaa mid aysan ku xadgudbin dadku, marka laga reebo dadkii awoodda sheegtay sida Namruud-kii Ibraahim iyo Fircoon-kii Muuse, waxaase dhacday in markii dambe ay sheegteen baraahimadii, baadarayaashii iyo suufiyadii, dhaqan xumadan oo ah mid la falgasha dabeecadda aadanaha marka dhinacyo badan laga eego, taasoo aannan ugu talogelin inaan halkan uga hadlano, waxa ay noqotay mid aad u faafta, taasoo ay ku biireen dadyoow aad u tiro badan oo adeegayaal u noqday hannaanka kelitalisnmada.

Kitaabka Towraad waxa uu la yimid firfrcooni ka saartay dadkii caajiskii iyo talo-saarashadii, kadib markii ay ahaayeen kuwa ka codsada Alle iyo Nabigiisa inay dagaalka wakiil uga noqdaan, waxa uuna u keenay nidaam ay raaceen oo ka saaray fawdadii riyooyinkii ay ku dhaqmi jireen, taasoo meesha ka saartay caqiidadii shirkiga, magacyadii tirada badnaa ee ilaahyadana waxa uu ugu bedelay magacyada malaa’igta, haseyeeshee boqoradii reer Kooheen raalli kuma aysan noqon towxiidkii ee waa ay fasahaadiyeen. Kadibna waxaa yimid Kitaabka Injiil oo keenay xasillooni iyo rajooyin, kuwaa oo haleelay quluub ay gubeen wadaaddadii iyo kelitaliyayaashii, waxa uuna Injiilku taageeray tubtii tawxiidka, haseyeeshee ducaaddiisii ugu horaysay awood uma aysan yeelanin inay fahamsiiyaan dawdyowgaa taabalaysan, oo diinta Kirshtaanka ka hor qaatay ummaddihii horumarsanaa, in macnaha aabenimada iyo wiilnimadu tahay mid sarbeeb ah, kaasoo lagu cabirayo macno ka weyn garaadka aadamiga, oo ay tahay in uu u hoggaansamo un, sida mas’alada qaddarka oo muslimiintu ay falsafadeynteeda ka dhaxleen diimaha Hindida iyo khurafaadka Giriiga. Sidaa darteed ayay ummaduhu u garteen macnaha

aabenimada iyo wiilnimada inay tahay dhalitaan sax ah, waayoo iyada ayaa u dhow fahamkooda hooseeya, kaasoo ay adagtahay inuu qaadaa-dhigo wax ka fog waxa ay ishoodu qabanayso, iyo sidoo kale ayaga oo hore u rumaysnaa in qaar kamid ah madaxda ku amar-ku-taaglaysa ay yihiin dhasha Alle, waxaana ku adkaaday in ay Nebi Ciise (NKH) siiyaan tilmaan ka hooseysa middii ay u ogolaadeen boqorradooda. Kadibna markii ay diinta Kirishtaanku faaftay oo ay ummado kala duwan qaateen, waxa ay xiratay dhar aan ahayn keedii, sidii ku dhacday diimihii ka horeeyay, dabadeedna waxaa lagu kabay dhambaaladii Polis iyo kuwii la midka ahaa, waxayna ku milantay muuqaalladii iyo qaab-cibaadeedkii sanamya-caabudkii Roomaanka iyo Masaarida, iyo sidoo kale cibaadadii reer Israa'iil, qeybo kale oo khuraafaad ah, iyo weliba muuqaalladii boqorrada iwm. Sidaa ayayna diinta Kirishtaanku ku noqotay mid weynaysa wadaaddada diinta ilaa ay dadkii gaarsiiyeen heer ay rumeystaan in ay wakiil ka yihiin Alle, ayna yihiin macsuumiin aan gafin oo awood sharci dejineed leh, iyo arrimo la mid ah oo ay Bortestanku diideen, kuwaasoo ah kuwii  u laabtay axkaamtii asalka ahayd ee Injiilka.

Kadibna Islaamka ayaa yimid asaga oo hufay diimihii ka horeeyay ee Yahuudda iyo Kirishtaanka, isagoo ah mid ku salaysan xikmad iyo go'aan adag, waxa uuna si dhamaytiran u burburiyay caqiidadii shirkiga, waxa uuna sal adag ku joojiyay xeerka xoriyadda siyaasadda oo dhextaal u ah nidaamka dimuquraadiyadda iyo kan aristoqraadiyadda, towxiidka ayuuna aasaas ka dhigay, waxa uuna hawlgab ka dhigay awood kasta oo diineed iyo mid talo-boob ah oo ku amar-ku-taaglaysa quluubta ama jirka aadamiga. Waxa uuna jideeyay sharci xikmad ku dhisan oo guud, kaas oo u suubada waqti walba, ummad walba iyo deegaan walba, waxa uuna abuuray xadaarad sarraysa oo ku salaysan fidrada, waxa uuna caalamka ku soo kordhiyay xukuumad sida tan khulafadii Raashidiinta ahaa, oo aan iyada oo kale dib dambe loo arag, koleey ku tahay muslimiinta dhexdooda, marka laga reebo xaalado dhif ah sida;  Cumar Cabdulcasiis, Al-Muhtadi Al-Cabaasi iyo Nuuraddiin Al-Shahiid oo kale. Khulafadaa Raashidiinta ahi waxa ay fahmeen macnaha iyo ujeeddada Quraankii ku soo degay luqadooda, oo ay ku dhaqmeen, kana dhigteen mid noloshooda haga, dabadeedna ay ku dhiseen xukuumad ku salaysan sinnaan oo iyaga iyo fuqarada muslimiintu u siman yihiin macaanka nolosha iyo qaraarkeedaba, waxayna muslimiinta dhexdooda ka sameeyeen qiiro walaaltinimo iyo xiriir dhisay hay'ad bulsho oo wadaag ah, oo aanan laga helaynin xitaa walaalaha ay aabbo iyo hooyo wada dhaleen, oo barbaarintooda iyo xanaanadooda ku hoos jira, iyadoo mid kasta oo hay'addaa kamid ah uu leeyahay hawl u gooni ah, qof ahaan, qoys ahaan iyo ummad ahaan. Haseyeeshee nidaamkaa sare ee hab-madaxeedka ah waa  nidaamkii Nebi Maxamed (NNKHA), kaa oo aan in badan sii waarin, marka laga reebo  xilliyadii Abubakar iyo Cumar, oo si dhab ah hannaankaa ugu socday, kadibna waxaa ku yimid hoos u dhac, dabadeedna waxa ay ummadda muslimku bilowday inay raadiso, oo ay u ooydo hanaankaa maamul, laga soo bilaabo tan iyo xilligii Cusmaan ilaa iyo maantadan, oohinta ummadduna waa ay sii jiri doontaa tan iyo inta maalinta qiyaamaha laga gaarayo, haddii aysan ku baraarugin ahmiyadda ay leedahay inay keenaan isbedel siyaasadeed oo ku salaysan wadatashi, nidaamkaa oo ah midka ay qaateen qeybo kamid ah reer galbeedka, kuwaa oo aan dhihi karno, waxa ay ka faa'iideysteen diinta Islaamka, in ka badan inta ay muslimiintu ka faa'iideen diintooda.

Qur'aanka kariimka ah waxaa ka buuxa fariimo badan oo burburinaya kelitalisnimada, oo noolaynaya caddaaladda iyo sinnaanta, koleey ku tahay sheekooyinka Quraanka ku soo arooray, waxaana guud ahaan laga soo qaadan karaa sheekadii Balqiis, Boqoraddii Saba oo ka soo jeedda Carabtii reer Tubbac, markii ay la hadlaysay madaxdii tolkeed: (Waxayna tiri madaxeey talo iga

siiya arrintan i hortaalla ma ahi mid keligeed go’aan gaarta adinka oo goobjoog ah mooyee, waxayna dhaheen annagu awood iyo dagaalba waanu kuu haynaa ee talada adigaa iska leh ee go’aan gaar, waxay tiri boqorraddu haddii ay deegaan (xoog ku) galaan (qabsadaan) waa ay fasahaadiyaan, dadkiisa madaxda ahna waa ay dulleeyaan, sidaa ayayna sameeyaan)[1]. Sheekadani waxa ay na baraysaa sida ugu haboon ee ay tahay in boqorradu ula tashadaan hogamiyayaasha bulshada, iyo in aanay talo goynin iyaga oo aan ra’yigooda dhagaysanin, waxa ayna tilmaamaysaa sida ay qasab u tahay in awoodda iyo qalabka dagaalkuba ku jiraan gacanta bulshada, boqorraduna ay leeyihiin keliya awoodda fulinta, iyo in lagu xaq-dhowro guddoonka talada, sidoo kale waxa sheekadu ay muuqaal foolxun ka bixinaysaa boqorrada kelitaliska ah.

Isla arrinkan oo kale waxaa lagu xusay sheekadii dhex-martay Nebi Muuse (NKH) iyo Fircoon ee uu Alle noogu sheegay Quraankiisa: (Madaxdii tolka Fircoon waxa ay dheheen kani waa saaxir cilmi badan oo doonaya inuu dhulkiina idinka saaro ee maxaad ku talinaysaan)[2], madaxdii ayaa qaarkood qaarka kale weydiiyay: War maxay idin la tahay? (Waxa ay yiraahdeen) iyaga oo Fircoon u sheegaya go’aankooda: (Dib u dhig, ballan kale u qabo) isaga iyo walaalkii, una dir magaalooyinka (ergo) soo kulmiya oo kuu keena sixroole kasta oo cilmi badan)[3]. Kadibna Quraanku waxa uu tilmaamay xogwareysigii dhexmaray madaxdii; (Kadibna taladii ayay isku khilaafeen)[4] taasoo ah taladii ay Fircoon u jeedin lahaayeen (Iyaga dhexdooda kadibna dooddii ayay ka dhigeen mid qarsoodi ah)[5] oo markii dooddoodii bannaanka taalay ay isku khilaafeen ayay go’aansadeen inay ka dhigaan dood albaabadu u xiran tahay, taasoo waafaqsan nidaamka maanta lagaga dhaqmo golayaasha baarlamaanka.

Iyada oo la eegayo dhamaan arrimahaa sare ku xusan, ma jirto sabab loogu tuhumo in diinta Islaamku taageersan tahay keliltalisnimada, iyada oo salka ku haysa boqolaal tusaale, oo ay kamid yihiin aayadahaa Quraanka ee cadcad iyo weliba kuwan: (Kalana tasho amarka)[6] oo loola jeedo arrimaha taagan, (Kuwa mu’muniinta ahoow addeeca Alle oo addeeca Rasuulkiisa iyo kuwa talada haya oo idin kamidka ah)[7] kuwaa oo ah culimada iyo madaxda sida ay isku waafaqeen culumada tafiisrka intooda badan. Waana dadka madaxda ah marka la eego erey bixinta siyaasiyiinta. Waxaa macnahaa xoojinaya ereyga Eebbe: (Amarka Fircoon ma ahayn)[8] oo loola jeedo taladiisa, iyo sidoo kale xadiiskii Rasuuulka (Madaxayga dhanka malaa’igta waa Jibriil) oo macnaheedu yahay midka aan la tashado.

Wax lala yaabana ma aha in uu ka siibto mancnaha (Kuwa talada u saaxiibka ah), fahamka dadka intooda badan, taasoo sababteedu tahay luggooyada culimada kelitaliska ah oo beddela macnaha ereyada, waxa ayna is halmaansiiyeen macnaha dabarka (oo idin kamida), oo loola jeedo mu’miniinta, iyaga oo ay ujeeddadoodu tahay in ay ka hor istaagaan muslimiinta inay ka fekeraan in kuwa daalimiinta ah ee u taliya aanay ku hogaaminaynin si waafqasan sharcigii Alle,

---

[1] An-Naml: 32-34
[2] Al-Acraaf: 109 - 110
[3] Al-Acraaf: 111-112
[4] Daa’ha: 62
[5] Daa’ha: 62
[6] Aala-Cimraan: 159
[7] An-Nisaa’: 59
[8] Huud: 97

kadibna ay u tillaabaan macnaha aayadda (Alle waxa uu amray caddaalad)[9], oo loola jeedo sinaansho, (Haddii aad kala xukumaysaan dadkana inaad ku kala xukuntaan caddaalad)[10], oo iyadana loola jeedo si sinnaan ah, kadibna ay u gudbaan macnaha aayadda (Ciddii aanan ku xukumin wixii (sharciga) uu Alle soo dejiyay waa gaalo)[11], kadibna ay halkaa kala soo baxaan in aanay waajib ahayn in la addeeco daalimiinta, haba ku andacoodaan qaar kamida culimada u janjeera dhanka madaxda in arrinkaasu waajib yahay, iyaga oo sidaa u samaynaya ka fogaansho ay ka fogaanayaan fidnada galaafatay kuwa badan oo ayaga lamid ah. Waxaa arrinkaa ka sii yaab badan ku dhiiranaashadooda qolloocinta fahamka macnaha (Amar) ee ku xusan aayadda (Goorta aan doonno inaan halaagno tuulo (deegaan) waxaan farnaa kuwood loo nimceeyay (Kheyr) kadibna fusuq ayay la yimaadaan kadibna waxaa ku waajiba qawlka Alle intaa dabadeedna waanu burburinaa burburin)[12], qolyahaa culimada ah dan iyo heello kama laha in ay Alle u tiiriyaan inuu asagu fusuqa amro… Alle sarreyn aad u weyn ayuu ka sarreeyaa waxa xilka leh oo ay ku tilmaameen… sida dhabta ahna ereyga ( Amar-naa) ee aayaddan ku jira macnahiisu - marka xarafka miimka la hoos dhabo/dhigo, lana adkeeyo/shido "Ammirnaa" waxa uu noqonayaa amiir ayaan uga dhignaa "Talada ayaan ugu dhiibnaa" kuwooda loo nimceeyay/kibray, markaa ayay fusuq la yimaadaan (Oo dadkooda dulmiyaan) kadibna waxaa ku waajiba cadaabka Alle (Cadaab ayaa lagu soo dejiyaa).

Waxaa iyadana intaa oo dhan ka sii yaab badan in ay ereyga "caddaalad" siiyeen macno guri, kaa oo ah in dadka loogu garsooro sida ay culimadu sheegeen, taasoo caddaaladdii ka dhigtay mid aan lahayn manco kaa ka duwan, sida la ogyahyna caddaaladdu luqad ahaan waa simitaan, dadka oo caddaalad loo sameeyo macnaheeduna waa dadka oo si siman loogu garsooro, waana macnaha aayadda (Alle waxa uu amray caddaalad)[13], taasoo la mid ah qisaasta Quraanku sheegay (Waxaa idinkugu sugan qisaasta nolol)[14], taasoo aan loola jeedin ciqaab oo keliya, sida ay u fahmeen dadka kelitaliska u qafaalan oo aanan garanaynin in garsoorku yahay qeyb kamida diinta, balse ay garashadoodu ku kooban tahay hortegidda garsoorayaasha oo keliya.

Culimadu waxa ay taxeen dadka aanan marqaatiga laga aqabalaynin, oo aan caddaaladda gelin, waxa ayna ku dareen qofkii suuqa dhexdiisa isaga oo socda wax ku cuna, haseyeeshee shaydaanka kelitalisku waxa uu halmaansiiyay in ay diidaan marqaatiga madaxda daalimiinta ah, waxaa suurogal ah in culimada loogu cudur-daaro aamusitaanka ay ka amuseen arrinkaan, iyada oo la eegayo dhaliilaha ay meelo kale ugu jeediyeen daalimiinta, su'aashuse waxa ay tahay cudur-daar ma ku helayaan qalloocinta macnaha aayadda (Ha idinka mid ahaato koox kheyrka (dadka) ugu yeerta oo wanaaga farta xumaantana reebta)[15], taasoo ay yiraahdeen arrinkani waa faral-kifaaya ee ma aha faral-cayn? Ujeeddaduna waxa ay ku sheegeen in dadweynaha muslimiintu iyaga dhexdooda is qabtaan oo wanaagga isu sheegaan xumaantana iska reebaan, iyaga oo meesha ka saaray la xisaabtankii ay koox ummadda  kamid ah la xisaabtami lahayd madaxda, waddadaa oo ah mida ay qaadeen ummadihii Alle kheyrka waafajiyay, kuwaas oo u gaar yeelay koox ay ku magacaabeen golaha wakiilada inay korjoogtayso lana xisaabtanto

[9] An-Naxl: 90
[10] An-Nisaa': 58
[11] Al-Maai'dda: 44
[12] Al-Israa: 16
[13] An-Naxl: 90
[14] Al-Baqarah: 179
[15] Aala-Cimraan: 104

maamulka guud: Siyaasadda, Dhaqaalaha, iyo Sharcidejinta, dabadeena ay halkaa kaga adkaadeen balaayada kelitalisnimada. Miyaanay korjoogtaynta iyo la xisaabtanka caynkan ah oo lala xisaabtamo madaxda aanu ka muhiimsanayn xubnaha bulshada dhexdoodu iney wax is faraan waxna iska reebaan. Dad Alloow yaa garanaya halka culimada kelitalisku ay ka keeneen inaanan madaxda lala xisaabtamin oo la weyneeyo, haddii ay caddaalad sameeyaanna ay waajib tahay in loo mahadnaqo, haddii ay dulmi la yimaadanna ay waajib tahay in loo sabro, fal kasta oo dulmigooda lagu diiddan yahyna ay ku tilmaamaan xadgudub, ciddii ka dambaysana uu dhiigeedu bannaan yahay.
Allahayoow kelitaliska iyo qolyaha ay jaalka yihiin diintaadii aad soo dejisay waa ay beddeleen, Allahayoow awood iyo xeelad aan taada ahayni ma jirto!.

Waxaa isweydiin mudan cudurdaarka ay yeelan karaan suufiyadda, oo dhaqaalaha ay madaxdu u fidiso mawlacyadooda dartood ay keentay inay yiraahdaan: Amiirka ugu sarreeya talada waa mid kamid ah awliyada Alle, talada uu wax ku maamulana waa ilhaam ka timid dhanka Alle, waxa uu maamulana waa muuqaallada sare, halka kuwa hoose uu maamulo qudbiga ugu sarreeya suufiyada “Algawth”, Allahygii hufaanta badnaanyoow maxaad dulqaad badan tahay.

Waa dhab, in haddii aanu ahayn dulqaadka Alle, uu dhulku la go’i lahaa Carabta, sababtoo ah waxa uu u soo diray rasuul ayaga kamid ah, oo u sameeyay xukumaddii ugu wanaagsanayd ee adduunka soo marta, taasoo ku qotontay qowlka rasuulka (Dhamaantiin waxaa tihiin raacato, qof kastana waxa uu mas’uul ka yahay wixii la raaciyay) taasoo loola jeedo in qof kasta uu yahay suldaan guud oo mas’uul ka ah ummadda. Weedhanina waa middii ugu sarraysay, uguna xeeldheerayd oo uu yiraahdo qof leh awood jaangooyo siyaasadeed, haddii ay ahaan lahayd ummadaha kuwoodii hore iyo kuwoodii dambaba, kadibna waxaa yimid kuwa munaafiqiin ah oo weedhan ka baddalay macnaheedii caddaa iyo keedii guud ee ay lahayd, iyaga oo la aaday macne muujinaya in qofka muslimka ah la raaciyay qoysiiska, mas’uuliyaddiisuna ay halkaa ku kooban tahay, sida ay u beddeleen macnaha ayadda (Mu'miniinta rag iyo haweenba qaarkood qaarka (kale) awliyo (sokeeye) ayay u yihiin)[16] ayaga oo u beddelay in wilaayadaa ay tahay midda ku marqaati-furka ee aysan ahayn wilaayadii guud, sidaa ayayna u beddeleen macnihii luqadda, diintiina u bedeleen, caqligiina u masaxeen illaa ay gaarsiiyeen heer dadku ay halmaamaan macnihii xoriyadda, sharaftii xoriyadda, waxaa intaa dheer inay dadkii gaarsiiyeen heer aysan fahmi karin sida ay ummad isu xukumayso ayada oo aanu ku amar ku taaglaynaynin keligiitaliye.

Waaba iyadoo aanay muslimiintu maqlin weedhii Nabiga (NNKH) ( Dadku waa ay siman yihiin sida ilkaha shanlada/feedha oo kale, Carabkuna kama wanaagsana Cajamka ilaa inuu ka Alle cabsi badanyahay mooyee). Xadiiskanna waxa uu ka midyahay kuwa ugu saxsan, waayoo waa mid xikmadda waafaqsan, wuxuuna fasirayaa aayadda oranaysa (Ruuxase ugu sharaf badan Alle agtiisa waa ka idiinkugu dhawrsasho badan)[17], Allena sha’nigiisu weynaaye waxa uu simay addoomadiisa kuwooda mu’miniita ah iyo kuwooda gaalada ah, xagga karaamada markii uu yiri: (Dhab ahaantii waanu sharafnay Ban’iiadamka)[18] kadibna waxa uu darajada karaamada u kordhiyay kuwa isaga keligii ka baqda (dhowrsada). Baqitaankuna macnihiisa luqad ahaan ma aha cibaado badni, sida uu xaalku markii dambe u noqday xaqiiqo ay culimada u adeega

[16] At-Tawbah: 71
[17] Al-Xujuraat: 13
[18] Al-Israa: 70

kelitaliyayaalku ku beereen quluubta dadka iyagoo macnaha (Alle agtiisa) ku fasiray in loola jeedo aakhiro, ee aanay khusaynin adduunyada, haseyeeshe baqdintu luqad ahaan waxaa loola jeedaa ka dhawrsasho ama ka fogaansho laga fogaado falalka xunxun iyo wixii keenaya ciqaabta Alle, sidaa darteed ayay macnaha aayadda (Ruuxase ugu sharaf badan Alle agtiisa waa ka idiinkugu dhawrsasho badan)[19] waxa ay noqonaysaa qofka dadka ugu wanaagsan waa kan ugu fogaanshiyaha badan dunuubta iyo cirib-xumada ka dhalata.

Waxaa halkaa ka cad in Islaamku salka ku hayo xorriyad, uuna dadka ka dulqaadayo culays kasta iyo sandulleyn, isla markaana uu farayo caddaalad, sinnaan, xaqsoor iyo walaalnimo, dhiirigalinayana samafalka iyo isjacaylka. Xukuumadiisuna waxa ay ku salaysan tahay: Wadatashi urustuqaadi ah, oo loola jeedo wadatashiga xubnaha wakiilda bulshada ah “ahlul xalli wal caqdi", ee bulshada kamidka ah, kuwaasoo heerkaa ku gaaray caqligooda ee aan ku gaarin awooddooda. Islaamkuna waxa uu saldhig uga dhigay maamulka ummadda: Sharcidejin ku timaada qaab dimuquraadi ah oo loola jeedo talo-wadaag, kaasoo aan dib ka faahfaahin doonno. Xilligii Nebiga (NNKH) iyo kii khulufada raashidiinta hawshu waxa ay ku socotay saldhigyadaa sare ku xusan, sida ugu dhamaystiran. Waxaa la wada ogsoonyahay in nidaamka Islaamigu aanu lahayn awood diini ah, oo aanan xad lahyn marka laga reebo cibaadada iyo xeerarka guud ee shareecada, xeerarka oo aanan gaarayn boqol xeer, kuwaa oo dhamaantood ah kuwii ugu qiimaha badnaa, uguna wanaagsanaa ee ay haleeli karayeen sharcidejiyayaalkii hore iyo kuwa dambaba.

Waa wax laga xumaado in diinkani yahay mid ku dhisan xorriyad, xikmad, oo sahlan, ayna muuqato sida uu uga horumarsanyahay diimihii isaga ka horreeyay, diinkaa oo ah mid dadka ka qaaday culaysyadii iyo dabarradii jiray Islaamka ka hor, oo tirtiray kala qoqobkii iyo kelitalisnimadii. Waxaa wax laga xumaado ah in diinkaa ay dulmiyeen kuwa jaahiliin ah, oo dhabarka u jeediyay xikmadihii Quraanka, kuna aasay hogagga dullinnimada, diinkaa oo aanan helin dad gargaarkiisa u istaaga oo baarriyaal ah, xikmad badan oo akhyaar ah, dabadeedna waxaa gacanta ku dhigay kelitaliyayaal iyo kuwa damacsan inay kelitaliyayaal noqdaan, waxayna u adeegsadeen waddo ay dadka ku kala geeyaan, ummaddana ugu kala qaybiyaan kooxo, waxayna ka dhigeen hab ay ku gaaraan danahooda siyaasadeed, kadibna waxa ay dayaceen qiimihiisii, waxayna dadkii diintan raacsanaa ku mashquuliyeen furuucda diinta iyo qeybaheeda hoose ee la sii ballaariyay, adkayn iyo shaki-gelin, iyo in wax aan diinta shaqo ku lahayn oo lagu soo daro, sidii ay horay u sameeyeen qolyaha diimiihii hore, illaa ay gaarsiiyeen heer uu noqdo diin adag oo ay dadku u qaateen in qolo kasta oo xarfaaan ah oo qortay buug ay ugu abtirisay Islaamka inuu dhab ahaan uga mid yahay diinta, taasoo keentay in dadku awood u yeelan waayaan inay gutaan waajibaadka, aadaabta iyo waxyaabaha dheeriga ah ee buugtaa ku qoran, marka laga reebo dad iyagu ka go’ay nolosha adduunyada, oo ku mashquulay waxa ku qoran buugtaa iyada ah, taasina waxa kale oo ay keentay in noloshii aadamiga ee dheerayd, oo weliba shaqa la’aantu ka badatay aanu qofku u kansho heli karin inuu barto Islaamka, sababtuna waa ayaga oo aanan awood u lahayn inay kala saaraan saxda  iyo qaldka ra’yiyada kala duwan, ee haddana isku soo laalaabanaya oo ay qolyihii lahaa ay muran iyo dood badan geliyeen, kadibna kala tageen markii ay ku heshiin waayeen ray’i qura, iyada oo mid kasta uu ku dhagan yahay go’ankiisii hore, ayna ula muuqato inuu xujadii ku oogay kii la doodayay, daliilna ku aamusiyay, balse xaqiidu tahay in mid waliba uu daal la aamusay, go’aansadayna inuu isaga haro doodda ma-dhalayska ah.

[19] Al-Xujuraat: 13

Kakanaantan ay diinta geliyeen qolyo la tartamayay kuwa dabka caabuda awgii, waxaa ku furmay ummaddii albaab cusub oo ah in la eedeeyo nafta, lana aamino inay mar walba gabood-fashay, isla markaaana aysan suurogal ahayn in laga lug-baxo xisaabinta nafta, iskaba daa in la xisaabiyo madaxda talada haysa, oo ay ahayd inay cadaalad iyo nidaam hagaagsan dadka ku maamulaan. Dayacan ku dhacay korjoogtaynta iyo la-xisaabtanka madaxda, oo ah dayac lagu sameeyay wanaagga oo la is faro iyo xumaanta oo la iska reebo, waxa uu fursad u siiyay madaxdii Islaamka inay ku talax-tagaan kelitaisnimadii, oo ay weliba seeraha dhaafaan, dhammaan arrimahaasina waa kuwii hore loogu sheegay xadiiska Rasuulka (NNKH) ee oranayay; (Wanaaga ayaad fari doontaan, xumaantana waad reebi doontaan, hadii aad ka gaabisaanna Alle waxa uu madax idiinkaga dhigi kuwiina sharta badan, kadibna ciqaabta teeda ugu xun ayay idin marsiin). Haddii aan eegno taariikhdii Abuubakar iyo Cumar (AHKN) iyo ummaddii ay hogaaminayeen, waxaan arkaynaa iyaga oo Alle quluubtooda markii horaba kheyr ku abuuray, barbaarintii Nebigana helay, inaanay ummaddu ka cafinin in ay la xisaabtamaan oo kor-joogteeyaan, oo aysan dhicin in ay si indho la'aan ah isaga dabagalaan.

Dadka qaar ayaa ururiyay arrimaha ay muslimiintu ka soo qalin-daarteen ummadaha kale, kuwaa oo aan diintooda kamid ahayn, marka loo eego Quraanka iyo xadiiska mutawaatirka ah iyo wiixii ay isla ogaayeen salafkii, waxayna yiraahdeen:

Kirishtaanka waxa ay ka soo qalin-daarteen nidaamka baadariyaasha, ayagoo ula baxay Al-Gawthiya (kuwii la gargaar weydiisanayay), waxayna siiyeen tilmaamihii  iyo tiradii wadaaddada ka hoos shaqeeya baadariga: Culimada, madaxda kaniisadaha iyo shuhadada ay weyneeyaan, waxayna isku ekeysiiyeen wadaaddada waaweyn iyo karaamooyinkoodii, ducaaddii diinta kirishtaanka faafinayay iyo sabarkoodii, kuwii cibaadada u go'ay iyo madaxdoodii, xaaladihii kaniisadaha iyo culimadeedii, wadaaddadii cibaadadaysanayay iyo sawiradoodii, soonqaadkoodii iyo waqtigiisii. Waxa kale oo ay ku daydeen kuhaannadii yo baraahiimadii iyaga oo uga dayday dhanka darajooyinka, lebiska, timahoodii iyo tusbaxa qoorta la suranayo. Waxa kale oo ay ku daydeen sanmya-caabudkii Roomaanka xaga qoob-ka-ciyaarka, ay ku dheehan tahay miyuusikada Naayga, ku talax-tagga carfinta maytida, janaasadda oo xaflad loo sameeyo, xoola loo gawraco iyo ubaxyo la saaro qabriyadooda. Waxayna raaceen hab-maamuuskii kaniisadaha iyo qurxinteeda, macbadyada iyo xafladahooda, xadraynta iyo miisaankeeda, heesaha ducooyinka iyo qaafiyaddooda, kaniisadaha oo laga dul-dhiso qubuuraha korkooda, booqashada qabuuraha oo loo safro, faynuusyo/nalal lagu qurxiyo, lana isu dulleeyo, iyo dadka ku aasan oo rajo lagu xiro. Waxaa kale oo ay ka qalin-daarteen barakaysiga raadadka sida ameelka iyo eebada, oo ay ka keeneen weynaynta rasaasta iyo usha, iyo gacanta oo xabadka la mariyo marka laga sheekaynayo saalixiinta, taasoo laga keenay marka kirishtaanku salaaxayaan saliibka xabadka u saaran, iyo sidoo kale xaqiiqada oo ay ka keeneen waxa dahsoon (sirta), Alle iyo kownkiisa oo la mideeyo oo ay ka keeneen caqiidada isku-milanka, khilaafada oo magaca un laga soo qaato, dhamitaanka tufta oo laga keenay cashada barakaysan, mawliidka oo laga soo qaatay miilaadka, xafaladiisa oo laga keenay ciidaha, calamada la lulayo oo saliibka laga keenay, looxyada lagu qoray magacyada wax lagu baryayo oo laga soo qaatay sawirada iyo dhagaxaanta kaniisadaha ku xardhan, magangalyada sheekha la sii marayo iyo cabsida oo laga soo qaatay cabsida qalbiga goorta ay asnaamta u foorarsanayaan. Waxayna horistaageen in hanuunka laga qaato nusuusta kitaabka iyo sunnada, sida Kaatooligu u horistaageen in la fahmo Injiilka, iyo sida culimada Yahuuddu u diideen in daliilka axkaamta ay ka qaataan Towraad.

Dab-caabudkana waxa ay ka qaateen in saadaasha mustaqbalka laga qaato xidigaha, iyo in xiddigaha laga cabsado, sawiradoodana astaan looga dhigo boqorrada, dabka iyo goobta lagu shidayana in la weyneeyo. Waxa ay uga daydeen qolyaha Buudada dhanka dariiqada, carbinta nafta iyo jirka oo lagu ciqaabo dabka iyo hub. abeesooyinka iyo dib-qalooca oo lagu ciyaaro, sunta oo la dhamo, durbaanka iyo saxamada oo la tumo, wardi, heeso iyo goosan duco ah oo joogto ah la samaysto, in la rumeysto in tufta, magacyda dadka geeriyooday oo loo yeerto iyo qardhaasta oo la xirto ay balayada xijaabayso iyo kuwa kale oo lamida, oo aad ku arkayso ilaa iyo maanta Budada Hindiya iyo dab-caabudka Faaris iyo Sandi, sida la sheegayna waxa arrimahaa dhanka Islaamka u soo minguuriyay qaar ay amid yihiin John West, Suldan Cali Manla, Albagdaadi, Xertii Kii Sheekha ahaa iyo Kii Faarisiga ahaa, haseyeeshee in arrimahaa loo tiiriyo dad gooni ah waa arrin u baahan husbsasho, waxaa kale oo ay isu geeyeen khurafaad iyo israa’iiliyad, ay ka sameeyeen cibaadooyin Alle loogu dhowaanayo iyaga oo u bixiyay “laduniyaad”.

Sidaa si lamid ah ayaa la oran karaa in bidcoolayda nasaaradu, gaar ahaan kuwooda dambe, wixii ay ka dhigeen diin inaanay diin ahayn, xitaa koley ku tahay caqiidada saddexda daraf leh oo aan asal ku lahayn diinta, sida laga soo guuriyay Nebi Ciise (NKH), taasoo ah wax diinta lagu kordhiyay, oo la farsameeyay, inyar oo kamid ahna ay yihiin bidco, intooda badanna ay yihiin wax soo jiray oo dad hore aya kaga daydeen. Culimada baarta raadadkii hore ayaa ku helay baaritaannadii ay ku sameyeen looxaantii ay ka heleen Hindiya iyo Aashuur, iyo qoraaladii ay ka heleen sanduuqyadii ay meydadka ku ridi jireen Masaaridii hore dhaliilo badan. Sidaa si la mid ah ayay heleen in waxyaabo badan oo gadaal looga kordhiyay kitaabka Talmuudka iyo bidcooyinka culimida Yahuuddu ay asal ku leeyihiin khuraafaadkii iyo raadadkii laga helay looxaantii Aashuuriyiinta, waxayna baaritaan xeeldheer kadib ogaadeen in inta badan khuraafaadka lagu biiriyay diimaha Bariga Soke badankood in laga soo qalin-daartay diimihii ka jiray Bariga Fog, waxaa kale oo baaritannadaa lagu ogaaday in nidaamka kelitalisku qariyay taariikhda diimaha, xogta la xiriirta hogaamiyayaashoodiina waxa uu ka dhigay mid aan la garanayn, sidaa darteed ayay dadka diimaha ka soo horjeeda ugu suuragashay inay beeniyaan jiritaanka Nebi Muuse iyo Nebi Ciise (NKHA). Sidaa oo kale ayuu kelitalisku muslimiinta dhexdooda u shaasheeyay taariikhda Aalu Baytka (AHRN), taasoo keentay dhalashada firqooyin mid weliba si gooni ah isu xigsiinaysa Aalu-Beytk sida: Imaamiyada, Ismaaciiliyada, Zeydiyada, Xaakimiyada iyo kuwa kale.

Guntii iyo gabagbadii, bidcadii shaasheysay iimaanka, oo dhalanrogtay diimaha waa mid soo kala tafiirantay dhamaanteed, hal meel ayayna ka soo burqanaysaa, kaas oo ujeedkiisu yahay mid qura, oo ah in dadka la addoonsado.

Qofkii si xeeldheer u fiiriya taariikhda Islaamka, waxa uu arkayaa in khulafadii iyo boqorradii hore kuwoodii kelitliska ahaa iyo qaar culimada cajamta kamida iyo qaar kuwaa raacay oo carabtii dambe ah, inay adeegsadeen ereyo ay ku been abuurteen Alle iyo Rasuulkiisii, si ay ummadda uga leexiyaan waddada xikmadda, iyagoo doonaya inay damiyaan iftiinka cilmiga iyo iftiinka Alle, haseyeeshee iftiinka Alle waa mid dhamaystirmaya, sidaa darteed ayuu Alle muslimiinta ugu xafiday kitaabkiisa kariimka, kaasoo ah qorraxdii cilmiga iyo khasnaddii xikmadda, asaga oo ka ilaaliyay in uu isbeddel haleelo, taasoo kamid ah mucjisooyinka Alle sida uu yiri: (Annagaa soo dejinnay Quraanka annagaana dhawri)[20], sidaa darteed ayay munaafiqiintu

[20] Al-Xijr: 9

markii ay ku fashilmeen inay Quraanka wax ka baddalaan, ayay macnihiisa inay baddalaan u beyreen, taasina waa mucjisad kale, waa tii Alle Quraankiisa ku lahaa (Kuwa qalbigoodu leexasho ku jirto waxay raacraacaan kan is shabaha (isu eg) doonid fidno (xumaan) iyo doonid ta'wiil (leexin macnaha) darteed)[21].

Waxaan aqristayaasha tusaale ugu soo qaadanayaa falalka kelitalisku kula kacay muslimiinta, oo ay kamid tahay in culimada Alle xikmadda siiyay laga horjoogsado fasiraadda qeybaha Quraanka kamidka ah ee la xiriira nimcooyinka Rabbi iyo akhlaaqda, tafsiir xeeldheer oo macnahooda si faahfahsn bannaanka u soo dhiga, sababtuna waa ayaga oo ka baqay inay khilaafaan ra’yiga dhagaweynta fahamkooda iyo dhaqankooduba hooseeyo, ama kuwa munaafiqiin ah oo madaxda ka ag dhow oo ay isku waqti ahaayeen, dabadeedna ay gaalaysiiyaan oo ay dhiigooda bannaystaan. Arrinka mucjisanimada Quraanka, waa mid kamida arrimaha ugu muhiimsan diinta, oo ay culimadu awoodi kari waayeen in ay xaqiisii cilmi-baariseed u oofiyaan, iyaga oo ku kaaftoomay min-guurinta wiixii ay culumadii hore ka sheegeen, kuwaa oo si duudub ah ugu macneeyay in mucjisinimada Quraanku ku kooban tahay inaanay cidina la iman karin isaga oo kale xaga fasaaxada iyo balaaqada, iyo inuu horay u sii sheegay in Roomaanku guuleysan doonaan marka la jabiyo kadib. Iyada oo haddii culimada fursad loo siin lahaa in ay si qoto dheer baaris ugu sameeyaan macnaha Quraanka, ra’yigoodana xor u ahaan lahaayeen, qoraaladoodana soo bandhigi lahaayeen, si lmid ah sida fursadda loo siiyay kuwa macnaha baddalaya  iyo kuwa awoodda haysta, ay dhici lahayd in culimadu soo bandhigaan  kumanaan aayaydood oo sita kumaanan mucjiso, maalin kastana waxa ay arki lahaayeen aayad Quraan ah oo macnaheedu la socdo waqtiga, taasoo caddaynaysa  runnimada ereyga Alle (Iyo wixii qoyan ama qallalan waxa ay ku suganyihiin kitaab cad)[22], ummadduna markaa waxa ay noqon lahayd mid rumaysa mucjisanimada Quraanka, si daliil iyo muuqaalba leh, kumana aysan kaaftoomeen u hogaansanaan iyo addeecid oo keliya.

Waxaa taa lamid ah in cilmigu  soo bandhigay qarniyadan dambe, xaqiiqooyin iyo muuqaallo badan oo dadka helay lagu sheegay inay yihiin culimo reer Yurub ama Maraykan ah, qofkiise si xeeldheer u eega Quraanka waxa uu arkayaa in badankoodu si toos ah ama dadban muddo hadda laga joogo 13 qarni ay ugu soo arooreen Quraanka, taasoo inta annan cilmigan la soo bandhigin dahsoonayd, haseyeeshee markii xaqiiqadan cilmiga ah ay banaanka timid isu bedeshay mucjiso Quraan, oo ka marqaati kacaysa in Quraanku yahay ereygii Alle, cid aan Alle ahayn oo waxa dahsoon taqaanna aanay jirin. Mucjisooyinkaa waxaa kamid ah in culimadu dhawaan ogaadeen in kownku ka askumay hawo (Asiir), Quraankuna markii uu tilmamayay bilawga kownka waxa uu yiri (Markaas ayuu Alle u qasday samada oo qiiq ah)[23], waxa kale oo ay culimadu soo bandhigeen in walxaha kownka guudkiisa saaran ay dhaqaaq joogto ah ku jiraan, Quraankuna waxa uu leeyahay (Waxaa calaamad u ah dhulka dhinta (abaarta ah) oo aanu noolayno)[24] ilaa uu ka gaaro (Mid kastana falag ayuu dhex dabaalan (ku meeraysan).)[25].

[21] Aala Cimraan: 7
[22] Al-Ancaam: 59
[23] Fussilat:11
[24] Yaasiin: 33
[25] Yaasiin: 40

Waxaa kale oo ay xaqiijiyeen in dhulku ka soo dhambalmay nidaamka qoraxda wuxuuna Quraanku leeyahay (Miyeyna arkayn kuwa gaaloobay in samooyinka iyo dhulku ahaayeen kuwo isku dhaggan oo aanu kala fujinay)[26].

Waxaa kale oo ay xaqiijiyeen in dayaxu ka falliirmay dhulka wuxuuna Quraanku leeyahay (Miyeyna arkaynin inaan ku imanayno dhulka annaga oo dhincyada ka nusqaaminayna)[27] wuxuu kale oo uu Quraanku leeyahay (Waxaa dhawaatay saacaddii (Qiyaame), dayixiina wuu dhambalmay)[28].

Waxaa kale oo ay xaqiijiyeen in lakabyada dhulku yihiin toddoba, Quraankuna waxa uu leeyahay (Eebe waa kan abuuray todobo samo dhulkana kala mid dhigay)[29].

Waxaa kale oo ay xaqiijiyeen in haddii aanay ahayn buuraha in culayska dhulku keeni laha inuu gilgisho marka uu meeraysanayo, Quraankuna waxa uu leeyahay (Wuxuuna ku riday (sugay) dhulka buuro inayna idinla iilan)[30].

Waxaa kale oo ay soo bandhigeen in sirta qaabdhismeedka kiimikada iyo walxaha aan muqaalka lahayn ay tahay faraqa u dhexeeya nisbada cabirrada iyo xadaynteeda, Quraankuna waxa uu leeyahay (Wax kastana Alle agtiisa qaddar (cabbir/jaangooyo) ayuu leeyahay)[31].

Waxaa kale oo ay soo bandhigeen in jamaadaadku leeyihiin nolol, noloshooduna ku dhisan tahay biyaha (Kana yeelnay biyaha (asalka) wax kasta oo nool)[32].
Waxaa kale oo ay xaqiijiyeen in nooluhu oo ban'iiadmku kamid yahay uu ka soo askumay jamaad, Quraankuna waxa uu leeyahy (Waxaan ka abuurnay dadka walax laga soo soocay dhoobo)[33].

Waxaa kale oo ay soo bandhigeen xeerarka guud ee bacrinta dhirta, Quraankuna waxa uu leeyahay (Allaha abuuray noocyada dhamaanteed oo ah waxa dhulku soo dhaliyo)[34] wuxuu kale oo uu leeyahay (Oo aan ku soo bixinay noocyo doog ah oo kala duwan)[35] waxa kale oo uu leeyahay (Way gilgilataa wayna kortaa waxayna soo bixisaa nooc kasta oo quruxsan)[36], waxa kale oo uu leeyahay (Midho kastana ka yeellay dhexdiisa laba nooc)[37].

---

[26] Al-Anbiyaa: 30
[27] Al-Anbiyaa: 44
[28] Al-Qamar: 1
[29] Ad-Dalaaq: 12
[30] An-Naxl: 15
[31] Ar-Racad: 8
[32] Al-Anbiyaa: 30
[33] Al-Mu'minuun: 12
[34] Yaasiin: 36
[35] Daa'ha: 53
[36] Al-Xaj: 5
[37] Ar-Racad: 3

Waxaa kale oo ay soo bandhigeen hannaanka hoosku uga dhasho qoraxda, Quraankuna waxa uu leeyahay (Miyeydaan ogayn sida Alle u fidiyo hadhka, hadduu doonana wuxuu ka yeeli lahaa mid xasillan (taagan) markaasaan ugu yeellay qorraxda korkiisa daliil (xujo))[38].
Waxaa ay sidoo kale ay soo bandhigeen habka doomaha iyo maraakiibta ku shaqeeya dhuxusha iyo korontada, Quraankuna waxa uu leeyahay kadib markii uu ka soo sheekeeyay gadiidka naflayda ah iyo kawa dabaylaha ku socda (Waxaana uga abuuraynaa iyada oo kale waxay koraan)[39].

Waxa ay soo bandhigeen jiritaanka bakteeriyada iyo saamaynteeda iyo furuqa iyo cudurada kale, Quraankuna waxa uu leeyahay (Oo uusan ku dirin korkooda shimbiro kooxa ah)[40] oo wadar wadar isu daba socda (Kuna tuuraysa dhagaxyo (ka samaysan dhoobo) la kululeeyay)[41] dhoobadaa oo ah midda biyo-dageenka oo qalalan, iyo aayado kale oo kuwaa la mid ah oo xaqiijinaya waxyaaba cilmigu soo bandhigay iyo xeerarka dabeecadda. Haddii aynu ka qiyaas qaadanno arrimahaa aan soo xusnay waxa ka dhalanaya in aayado badan oo Quraanka kamid ah macnaha ku aasan ay dibadda u soo bixi donaan mustaqbalka, taasoo cuboonaysiin u ah mucjisanimada Quraanka iyo ka warramitaankiisa arrimaha dahsoon, inta waqtigu baaqi yahay habeenka iyo maalintuna jiraan, waxaana iman doona maalin uu cilmigu soo bandhigi doono in jamaadaadku ay ku tarmaan bacrinta sida ay tilmamayso aayadda Quraanka (Wax walbana waxa aan ka abuurnay laba nooc)[42].

La soco qeybta 3xaad

---000---

WQ: Cabdiraxmaan Al Kawakibi
Tarjumadii Dr. Maxamed Sh. Cali (Doodishe)
Email: dodishe76@hotmail.com

[38] Al-Furqaan: 45
[39] Yaasiin: 42
[40] Al-Fiil: 3
[41] Al-Fiil: 4
[42] Ad-Daariyaad: 49